



Adoon baa dambaabay dambi, wuxuu yiri: Allahayow ii dambi dhaaf

Abii Hurayra Allaha ka raali noqde waxaa laga wariyey Nabiga scw inuu ka wariyey Nabiguna Rabigii ka soo wariyey, inuu yiri: " Adoon baa dambaabay dambi, wuxuu yiri: Allahayow ii dambi dhaaf, Ilaahay sareeye wuxuu yiri : Adoonkaygaa dambaabay, wuxuuna ogaaday inuu leeyahay Rabi dambiga dhaafa, kuna ciqaaba, hadana wuu ku noqdoo wuu dambaabay, wuxuuna yiri : Rabiyouw, ii dambi dhaaf, Ilaahay ayaa yiri: adoonkaygaa dambaabay, wuxuuna ogaaday inuu leeyahay Rabi dambiga dhaafa, kuna ciqaaba dambiga, hadana wuu ku noqdoo wuu dambaabay, wuxuuna yiri: Rabiyouw ii dambi dhaaf, Ilaahay ayaa yiri: wuu dambaabay adoonkaygu wuxuuna ogaaday inuu leeyahay Rabi dambiga dhaafa, kuna ciqaaba dambiga, fal waxaad doonto, waan kuu dambi dhaafaye".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu rabigii ka wariyey inuu adoonku markuu dambi falo ee uu dhoho: Allahayow ii dambi dhaaf, inuu Ilaahay dhahayo: adoonkaygaa dambi falay, oo ogaaday inuu leeyahay Rabi dambiga dhaafa, kaasoo astura oo u dhaafa dambiga, ama ku ciqaaba, waan kuu dambi dhaafay. Hadana wuu ku noqday adoonku oo wuu dambaabay, wuxuuna dhahay: Rabiyouw ii dami dhaaf, Ilaahay ayaa dhahay: adoonkaygaa dambi ku dhacay, wuxuuna ogaaday inuu leeyahay Rabi dambiga dhaafa, oo astura una dhaafa adoonkiisa, ama ku ciqaaba, waan u dambi dhaafay adoonkayga. Hadana wuu ku noqday adoonkaygu oo dambaabay, wuxuuna dhahay: Rabiyouw ii dami dhaaf, Ilaahay ayaa wuxu dhahay: adoonkaygaa dambi ku dhacay, wuxuuna ogaaday inuu leeyahay Rabi dambiga dhaafa, oo astura una dhaafa adoonkiisa, ama ku ciqaaba, waan u dambi dhaafay adoonkayga, ha sameeyo wuxuu doono kol haduu markuu dambi falaba ka istaagayo, kana murugoonayo, go`aansanayo in aanu ku laaban doonin, laakiin naftiisu ka adkaanayso, dambigiina ku dhacayo, intuu sidaa yahay oo dambaabay kana tawbo keenayo waan u dambi dhaafi, tawbadaa baabi'isa wixii ka horeeyey.

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

